# Golaha Wakiilada JSl

## Waaxda Hadal Qoraalka

### *Minuteska*

**Dooda Xeerka Nabadgalyada Guud**

**Kal- fadhigii 15aad** **Fadhiyadii 7.8 iyo 9aad** **04/07/2011**

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 15 Mudane, waxayna Socotay3 maalmood, waxay bilaabantay 02/07/2011 waxayna dhamaatay 04/07/2011kii***

1. **Xil. C/Raxmaan Maxamed Jaamac:-** Xeerkan waxaad moodaa in xeerar badan ama qaybo badan oo nabadgelyada aan ahayn lagu soo daray oo u baahan xeerar kale in loo sameeyo , sida bandhig masraxeed iyo daawasho filim, tartanka ciyaaraha, furashada goobo wax lagu daawado, ilaalada goobaha Tartamada, caruurta ka yar 15 jir ee jisha filimada iyo riwaayadaha , waxaa, waxaan u arkaa inaanay nabadgelyo ahayn ee ay tahay arintii wasiirka dhaqanka iyo ciyaaraha ayaa lagu soo daray, markaa anigu waxaan qabaa in xeerarkale loo sameeyo sababtoo ah, hadaan imika waxka taabto arintan, waxaad moodaa aniga iyo c/raxmaan saaxiibkay oo aanu ka wada shaqayn jirnay filimada, ilmo ka yar 15 jir anigu ma garanayo sababta loogu soo daray xeerka nabad gelyada.

**Qodobka 7aad, f/3aad**, cutubka ciidanka qaranka (millateriga) ah ee lagu xoojinayo ciidanka booliska si ay ugu qaybqaataan sugida nabadgelyada gudaha, inta ay ku jiraan hawlgalkaas , waxay lahaanayaan shaqsiyada ciidanka booliska. **Markaasi shakhsiyada maxaa loola jeedaa? Ma dharkay xidhanayaanbaa? Ma hubkay qaadanayaanbaa? Ma wejigooda siday u ekaysiinayaanbaa? Shakhsiyada ciidanka booliiska maan garan waxloola jeedo, markaa waxaan odhan lahaa shakhsiyada ciidanka boolisku waxay tahay?**

**Qodobka 8aad f/1aad** Waxaa la yidhi: qofka saldhig booliis ayaa lagu haynayaa ama xabsi ayaa la gaynayaa mudo go'an mudadaa go'ani waxay noqonaysaa waxaa afka ingiriisiga lagu yidhaahdo ''*arbitery detention* with *out trail"* hayn qof iyadoon xabsi la gayn , markaa mudada go'an ma cada waa in la cadeeyaa.

**Qodobka 9aad f/4aad:-** Maxkamaddu awooda u lihi waxay amri kartaa qof loo arkay inuu nabadgelyada halis ku yahay, in aanu muddo cayiman ka bixin dalka, magaalada uu joogo ama gurigiisa, amase in su'aalo laga waydiiyo baadhis la xidhiidha arrin nabadgelyo. **Markaa mudadaa cayiman ee aanu dalka ka bixi Karin waa in xeerka lagu cadeeyaa intay noqoyso**

**Point of order: xil. Farxaan:- xildhibaanku gudida xeerka keentay ayuu ku jiraa markaa dooda inuu ka qaybqaato ma banaana**

**Gudoomiyaha**: - **muddanayaashu hayga raali ahaadaan, mudanayaasha kale ee Gudidu kama qaybqaadan doonaan dooda.**

**Qodobka 10aad far. 1aad:** Waxaan ku joojin lahaa Halka ay ku qorantahay ugu yaraan saddex cisho ka hor, si loogu ogolaado. **Waxaanaan ka reebi lahaa "ama loogu diido hadii loo arko**

**in uu nabad gelyada wax u dhimayo, sababtoo ah awoodii oo dhan W. arimaha gudaha ayaa la hoos geeyey, markaa farqada si loogu ogalaado ha lagu joojiyo**

**Qodobka 14aad far. 2aad:** halka ay ku qorantahay waxaa lagu xukumayaa 6bilood oo xadhig ah qof disorder sameeyey ama buuq mudaharaad lagu qabtay, **waxaan qaabaa 6 bilood way ku badan tahay ee 3 bilood ha laga dhigo ayaan odhan lahaa , waayo waa ciqaab ku wayn qof buuq lagu qabtay in 6 bilood la xukumaa.**

**Qodobka 16aad far. 2aad.** ogolaanshaha wasiirku wuxuu ku xidhnaan kara soo jeedinta gudi qaran oo farsamo, **gudidu halkan kuma cada xeerkani gudi ma jidaynayo waxaa weeyaan arinkaynu soo qaadnaba hadii gudi uun la yidhaahdo ma haboona in halkan la dhexgeliyaa ayaan qabaa anigu waayo xeerku wuxuu jidaynayaa gudi nabadgelyo oo qaran ee ma jidaynayo gudi farsamo qaran, markaa waa ni laga saaraa far. 2aad ee Qoddobka 16aad waa in laga saaraa soo jeedinta gudi farsamo oo habe yaraatee meel ku lahayn xeerkan inhoryaala.**

**Qodobka 17aad:-** dhoofinta iyo soo dejinta walxaha qarxa ee ku xusan qodobka 16aad waxaa la siiyey awoodeeda inuu faxaso Wasiirka arimaha gudaha **markaa waxaan odhanlahaa gudida nabadgelyada heer qaranku awoodaa hala eegto wasiirka arimaha gudaha**

**Qodobka 21aad:-** warshaha dhawaaqa dheer leh waxaa la geliyey baraked *"puplic Nuisance"* **public nuisance lama yidhaahdo wershaha dhawaaqa dheer, waxaa la yidhaahdaa reerka kugu xiga oo music dheer shita , meellagu ciyaaro , buuq dhaca, oo aad u dheer oo sagaal jeer iska yimaada markaa waxaasaa loo yiqaanaa public nuisance. Markaa waxaan qabaa public nuisance waa xeergaara oo iskii u jira oo nuisance pollution ayaa la yidhaahdaa, markaa in warshadaha dhawaaqa dheer lagu soo daro xeerkan waxaan u arkaa wax xeerkan dheeraad ku ah.**

**CUTUBKA 4AAD:-** madadaalada dadwaynaha , goobaha liisanada , kihnadaha ganacsiga, arimahani waa arimihii dowlaha hoose**,** anigu waxaan qabaa xeerka dowlaha hoose iyo gobolada ha lagu daro, liisan la bixinayo,ciyaaro iyo dhaqan iyo filimo la jilayo inaanay xeerka nabadgelyada soo wada geli ee wixii ka danbeeya **Qodobka 19aad** kale badhweeyaan xeerka waa ku dheeraad waxaa weeyaan xeerarkale oo ay tahay in lagu dhaqo meelo kale oo maamul ama ganacsi ayaa lagu soo daray waxaan odhanlahaa xeerarkale ha loo sameeyo.

2. **Ibraahim Axmed Raygal:-** Marka ugu horaysa waxaan u mahad naqayaa Guddida xeerka soo diyaarisay, xeerkuna waa xeer aad u fiican, balse waxaa Mugdi iga jiraa Gudiddii hore ee Nabadgalyada Qaranka xukuumadii hore ku shaqayn jirtay, xukuumada cusubina tiri waa la laalay iyo xeerkani siday isu waa faqayaan, hase ahaatee waan ku hambalyaynayaa Guddida xeerkan, markaan u soo dago xeerka.

**Qodobka 4aad f/2aad** ee xadka addeegsiga xeerka, ayaan ku biirinayaa, **waxaa lagu ilaalinayaa Muwaadiniinta Hantidooda gaar ahaaneed, caafimaadkooda iyo tan qaranka, waxaana ula jeedaa markaan caafimaadka leeyahay waxaa jira warshado iminka dalka laga sameeyay oo waxyaabo badan oo caafimaadka u wanaagsanayn oo hadana dalka ka shaqeeya,** hantida markaan ka hadlayo, waxaan u jeedaa hantida dalka oo la xado ama cida xadaysa oo gacan lagu siiyo, markaa sidaas ayaan farqadan cusub ula jeedaa.

**Qodobka 5aad, f/1aad** Halka Heer qaran ee Gudidda **waxaan odhanayaa Heer qaran wuxuu ka koobnaanayaa Madaxweynaha oo Gudoomiye u ah Dastuurkuna siinayo, Xubin ka tirsan Gudidda Nabadgalyada ee Golaha Guurtida, waxaan Heerkastana ku kordhin lahaa Xubin Culimo, sidoo kale Xubin Madax dhaqameed.**

**Qodobka 10aad f/1aad** halka ay ku qoran tahay ( in loo diido hadii loo arko in uu nabadgalyada wax u dhimayo) **waxaan halkaa ku kordhinayaa weedhkale oo ah ama laga badalo jadwalka (wakhtiga)**
**Faqrada 2aad** Erayga ***Xataa*** oo soo noqnoqday oo aan eray sharciyeed ahayn, **waxaan ku badalayaa AMA,** sidoo kale **Faqrada 3aad** halka Xataa **waxaan iyana u badalayaa AMA, waayo erayada qaarna eray sharciyeed qaarna waa eray sheeko, markaa Xataa kuma haboona xeerka.**

**Qodobka 13aad f/2aad** oo ah joojinta iyo kala kaxaynta banaan-baxyada iyo shirarka dadweynaha waxaa u xil saaran ciidanka Booliiska, si xeerka waafaqsan. **Halkaa waxaan ka dhigayaa waxaa u xil saaran Gudoomiyaha Guddida Nabadgalyada Qaranka iyo Booliiska.**

**Qodobka 39aad** ee talaabooyinka ka hortagyada Danbiyada, waxaan odhan lahaa marka laga hadlayo qofka waxaa sameeya waxaa lagu xukumayaa waxaa, waxaa ka haraysa waxyaabaha qof ama bulshadu danbi galo keenaya, waxaana ka haboon hab dawladeedkana ku fiican in laga hortago waxyaabaha keeni kara in danbigaa qof ama bulshadu gasho, markaa waxaan odhan lahaa anigu:-

- ✓ Adeega dawlada oo bulshada gaadhi waaya sida waxbarashada ama caafimaadka ama adeegii oo meel dhexe lagu xuurtaysto oo bulshadii gaadhi waaya,
- ✓ Shaqa la’aanta, gaar ahaan tan dhalinyarada soo foodsaaraysa iyo xoolihii oo dhamaaday oo dadkii magaalada ku soo qulqulayaanQaabka shaqada loo bixiyo ama dadka loogu bandhigo
- ✓ Gurashada ama bililiqaysiga Khayraadka dalka iyadoo laga faa’iidaysanayo sida aanay bulshadeenu ugu diyaarsanayn khayraadka la guranayo.

Waxyaabahaas, waa waxyaabaha laga horaysiin karo ee keeni kara in danbi la galo.

**Qodobka 40aad** waxaan ku biirin lahaa faqrada 3aad oo ah **xaafadaha iyo meelaha bulshadu ku nooshahay, waayo waxaynu ognahay qaraxyadii ka dib xaafaduhu waxay leeyihiin ilaalo gaar ah iyo ceelasha dadku cabaan iyo shirkadaha, sida ka dhacday barigii dhowayd Oodweyne ee ceelasha dadku ku sumoobeen,**

**Qodobka 41aad.** Qodobka **waan mamnuucayaa, waana in shirkadaha iyo xaafaduhu iyagu inay qortaan oo loo tababaraa. Maaha in ciidanka shirkado iyo xaafado lagu kala qoro.**

3. **Adan X. Diiriye dirir: -** Xeerka magaca uu sitaa waxa weeye Xeerka nabad gelyada guud, anigu waxaan odhan lahaa nabad-gelyada uun yaan laga dhigin magacaase**, xeerka ilaalinta anshaxa iyo nabadgelyada guud ha laga dhigo,** sababta aan magacaas u qaatayna waxaa weeyaan iyada oo distoorkeenu dhigayo Golaha Wakiiladu waa xeerdejinta koowaad hadana waxaa jira wax uu qaybqaybiyey oo ah sida maaliyada oo kale waxaa qaybku leh golaha wakiilada.

**Qodobka 57aad** ee dastuurka waxaa uu sheegayaa golaha guurtida ee JSL oo ah golaha odoyaasha waa qaybta labaad ee xeer-dejinta, wuxuu gaar u leeyahay wixii xeerku saabsan diinta, dhaqaalaha, iyo nabad gelayada, **Qodobka 61aad** ee dastuurku wuxuu isna sheegayaa awooda iyo waajibaadka guurtida, far.1aad: wuxuu ku sheegay in awooda iyo waajibaadka Golaha Guurtida inay tahay dejinta tahay dejinta wixii xeerku saabsan xeer nabad-gelyo,diinta , dhaqanka.

markaa waxaan leeyahay maadaama Golaha Wakiilada khaas looga yeelay wixii maaliyad khuseeya, markaynu nabad gelyo khaliya ku koobno xeerkan ina horyaala, waxaynu u talaabaynaa awood aynaan lahayn oo cid la siiyey oo distoorku u cayimay, markaa waxaa weeye hadii magucu caynkan ahaanayana waa in loo daayo cidii lahayd oo ah golaha guurtida hadii kalena magaca aynu waxka bedelno, hadii magaca waxlaga bedelayona waxaan odhanlahaa waa in laga dhigaa “xeerka anshaxa iyo nabadgelyada guud.

Maanta waxaa wadankeena ugu badan ee ka dhaca ee galahana lagaga hadlaa waa rabshadaha ka dhaca dhallinyarada ciyaaraha iyo garoomada ciyaaraha iyo ciyaalka xaafaha ee iyagoo kooxo ah iska horyimaada, iyagoo si wadarana wax isu yeela, si wadarana wax u gaysta.

Xeerkan public order law la odhan jiray xukuumadan hada joogtaana ay laashay qoladii horena wax ku xukumi jir tay, habkii ay qoladii hore u adeegsan jirtay waxaa ka mid ahaa oo kow ka ahaa:- **in dhalinyadaa ciyaaraha isugu yimaada ee marka danbena rabshadaha gaysata, iyo dhaliyaradaa xaafadaha loo adeegsada.**

**Qodobka 1aad**: halka ay ku taalo eray bixinta, **waxaan ku soo dari lahaa shaqada guud kelmaha ay ku taalo shaqada guud in la macneeyo oo halkaa ay ku taalo eray bixinta la soo raaciyo oo la macneeyo shaqada guud oo macnaheeda la raacinayo.**

**Qodobka 5aad, far/1aad:-**waxaan soo raacin lahaa inkastoo mudanihii iga horeeyeyba uu taabtay, marka laga hadlayo nabadgelyada qaranka marwalba waxaa kow ka ah madaxwaynaha, madaxwanuhu ama ha ka maqnaado saacadaasi hadii aanay munaasib ahayn ama ha ka qaybgalee, laakiin marwalba waxaa munaasiba in madaxwaynuhu marwalba uu kow ka yahay nabadgelyada qaranka.

**Qodobka 16aad, far/1aad:-** waxaan odhanlahaa halka ay ku qorantahay “ ma banana soo saarista “ **kelmada soo saaris oo meelo badan xeerka kaga jirta oo aanay cadayn macnaheedu , soo saaris macnaheedu ma wuxuu noqonayaa lasoo bixid meel waxlagala soo baxayo? Mise waxay noqonaysaa (samayn) wax la sameeyey oo manfucture ayey noqonaysaa, markaa haday tahay manfucture bal macne kale oo bedeli kara kelmada soo saarista loo sahamiyo.**

**Far.2aad:** ogolaanshaha wasiirku wuxuu ku xidhnaan kara soo jeedinta guddi qaran oo farsamo, **Waxaan leeyahay kelmada qaran ha laga saaro oo ha laga dhigo “gudi farsamo ‘’**
**Qodobka 17aad:-**iyo qodobo kale oo la xidhiidha marka la leeyahay waxaa bixinaya Wasiirka **waxaa weeye inuu la tashado gudigii uu ka midka ahaa ee aanu keligii noqon, isagu qoraalka ha yeesho balse markuu go’aanka gudiga ka soo qaato inuu bixiyo wixii looga baahan yahay markaa ee aanay keligii ku koobnaan.**

Waxaan kaloo ku kordhinlahaa Qodobadaa la xidhiidha talaabooyinka lagaga hortegayo masiibooyinka qodobada ay khusayso oo dhan waxaa laga hadlayo ee walxaha qarxa oo dhan ama ha noqoto kuwo qarxa ama kuwo suna, wixii waxyeelaya marka la faxayo ama la kaydinayaba inay waxaasi ciyinaadaan oo la yidhaahdo waa shayga magacaa leh, waa shayga tiradiisu intaas ka kooban tahay, hadii waxaasi hadhow suuqa galaan ama inta qof uu iska qaato intuu doono keeno inta kalena suuqa la galo, dee markaa waxa weeye dhibaatadii lagama feejignaan, markaa waa inay marwalba cayiman tahay, oo la yidhaahdaa 10 xabo ayaa halkaa la dhigay.

**Qodobka 21^aad^ f/1^aad^** marka warshadaha iyo waxyaalaha codka sameeya la leeyahay waxa loo sameeya meel go'an, kuwa maanta samaysan ee jira waa in la raaciyaa oo la yidhaahdaa, kuwa iminka jira waa inay sameeyaan, wixii dhawaqa ay iminka sameeyaan wax baabi'iya oo nuuga, markaa kuwa xaafadaha ka dhexsamaysan ee dhawaaqa sameeya waa inay sameeyaan wax codka nuuga oo yareeya, oo faqrada loogu daraa qodobkaa.

**Qodobka 27a^ad^** waxaa baadhi kara cid cayiman baa ku taala halkan, **markaa waxaan ku daray faqrad 6aad cusub oo ah gudida ruqsada bixinta oo dhan ama qayb ka mid ahi way baadhi karaan,**

**Qodobka 28^aad^ f/2^aad^** ma cada qodobkan waayo waxaa jira film caruuri matalayso oo manaafacaad leh oo aduunkoo dhan laga sameeyo sida waxbarashada oo kale, markaa waa in wixii manaafacaad leh laga reebaa oo aan la mamnuucin, oo laga reebaa, Faqrada 3aad ee isla qodobkan, ma ilmahaa ruqsada la siinayaa, mise waa cida filmka samaynaysaa, markaa ma cada, oo in ilmaha la siinayo ruqsada ayaa halkan ku taal, **markaa taana dib haloogu noqdo.**

**Qodobka 30^aad^** ee odhanaya waxaa reeban dhamaan noocyada khamaarka ee ay shareecadu reebtay in fasaxo. **iyo cida ka hawlgasha ayaan xaga danbe ka raaciyay qodobkan.** Qodobka 33aad ee ka hadlaya ilamaha 15 jirka ah ee darbi jiifka ah, iminka hadaad suuqeena eegtaan, waxaa ku jira darbi jiifka qaar waaweyna oo darbiga jiifa ma sida ay u dhex jiifaan baa loo daynayaa mise sideeda ayaa lagu daynayaa, **markaa faqrad 4aad ayaan ku darayaa oo odhanaysa wixii 15 jir ka weyn waa inaan loo ictiqaadin darbi jiif ama lagu dhex arkin ama aanu xuquuda darbi jiifka aanu helin.**

**Qodonka 34^aad^** ee la leeyahay waa in laga diiwaangaliyaa ururada noocay doonaan ha noqdaane**, anigu waxaan ku daray faqrada 6aad oo dhanaysa ururada siyaasada waa inaan la raacin ururada bulshada ee kale ee la leeyahay ha isdiiwaangaliyaan oo ha iska diiwaangaliyaan badhasaabada, WA bilaahi tawfiiq.**

**4) Cali Xassan Maxamed:-** horta guddidii soo diyaarisay waan u mahadnaqayaa, guud ahaan laba kalmdood hadaan xeerka ka idhaahdo, inkastoo aanay ku soo qorin xeerka gudidu, waxaan ujeeda xeerka laga leeyahay, xeerku wuxuu iswaafajinayaa ilaalinta nabadgalyada guud iyo ilaalinta xuquuda guud ee qofku leeyahay Bill of rights ee dastuurku tilmaamayo, labadaasuu xeerku iswaafajinayaa, markaa waa in qofka wax lagu qabanayaa uu danbi ahaataa, isla markaana uu helaa xaqa isdifiaaca iyo dacwada sharci, sidoo kale aminigii guud baa meesha lagu ilaalinyaa.

Waxaan taageerayaa soo jeedintaa **Xill. Aadan** ee ahayd Magaca ***xeerku nabadgalyada qaranka iyo anshaxa***, markaa labadaba ha lagu daro ayaan odhan lahaa, sidoo kale waa in xeerkan la

akhriyaa xeerka ciqaabta guud, markaad xeerka ciqaabta guud ka bilawdo qodobka 505 iyo ilaa inta ka danbaysa wuxuu ka hadlayaa xeerkan oo waxaa la yidhaahdaa Publlic order and public tranquility, markaa xitaa ciqaabaha meelaha qaar waa iskaga mid meelaha qaarna waa ku kala duwanyihiin markaa waa in la iska akhriyaa waayo xeerka ciqaabta guud waa xeer Valid oo maxkadahana wuu yaalaa,

**Qodobka 5aad** Xarfaha A,B,C iyo D waa in B,T,J iyo X lagu badalaa, oo markasta caado inoo noqotaa isticmaalkoodu maadaama xeerku Af-somali ku qoran yahay, doodaasi way soo noqnoqtaa , oo mararka qaar guurtida ayaa inagu soo celisa.

**Qodobka 6aad f/3aad** had iyo jeer waa inay dastuurka waa faqsanaadaan wuxu, waana meelaha xeerka laga waafajinayo xuquuqda asaasiga ah, halka maxkamada awood u leh ayaana lagu joojiyay markaa 48 saacadood ayaan ku daray waana dastuuri.

**Qodobka 8aad** isna soo jeedintii aadan baan taageeri lahaa oo aan ku dari lahaa, taas oo ah dhalinyarada rabshadaha samaysa, qodobkani wuxuu leeyahay xadhiga qof lagu tuhunsanayahay inuu halis ku yahay nabadgalyada qaranka, markaa waa in lagu daraa dhalinyarada rabshadaha samaynaysa oo booliisku amar u haystaan inay qaban karaan, isla markaana maxkamad ku horgeeyaan 48 saacadoo, faqrada 2aad ee isla qodobkan, markaa waxaa ku taala 24 saacadood dastuurkuna wuxuu qorayaa markasta 48 saacadood gudohood, waa in markaa 48 saacadood gudohood laga dhigaa.

**Qodobka 3aad** wuxuu sheegayaa, wakhtiga la hayn karo oo maxkamadu ogolaansho bixin karto in lahayo, halkaa wuxuu yidhi waa 30 maalmood, hadana wuxuu yidhi hadii la soo cesho waa 30 maalmood oo kale, waxaan filayaa xeerkii nidaamka garoosrku isna 45 cisho sheegayay, markaa xeerkii nidaamkii garsoorka la waafajiyaa.

**Qodobka 9aad,** inyar baan ku darayaa, awoodaha guddida nabadgalyada, wakhti lama qaban buu leeyahay, markaa 3 biloodba marbaa dib loo qiimaynayaa markaa wakhtigaasi ma furnee 3 bilood baa lagu xadiday,

**Qodobka 10aad f/1aad**, waxaan filayaa in booliisku kaga fiican yahay wasiirka, oo ay eegaan in meesha nabadgalyadeed khalkhalgalikarto, markaa waxaan halkaa soo jeedinayaa in booliiska loo badalo. Qodobka 14aa faqradiisa 2aad xooga lagu ka xaynayo lama cayimin, markaa wuxuu u baahan yahay in la sii cadeeyo waxayaabaha lagu kala kaxaynayo, sida gasmaska oo kale, iyo waxyaabaha lagu kala kaxayno dadka, markaa qodobkaa waa in la sii sharaxaa, ma cadee.

**Qodobka 16aad,** soo saarista walxaha qarxa, iyo cutubka gabigiisuba wuxuu ku qoran yahay xeerka ciqaabta guud, markaa waxaad moodaa xaga ciqaabta inay isyar khilaafsanyihiin, sida lacagta iyo ganaaxa, markaa 3 bilood ha loodaayo ayaan odhan lahaa, iyadaa yara macquulsane,

**Qodobka 34aad** waa qodob xasaasi oo runti u baahan in laga baaraan dago, ururada iyo shirkadaha diiwaangalintooda, faqrada 1aad halka A,B waa in laga dhigaa B,T. waxaana jira xeerarka oo dalku leeyahay sida NGOda xeerkooda ayaa loo raacayaa, haduu urursiyaasadeed yahay sidoo kale xeerar iyo dastuurkaa sheega, haduu shirkada yahayna company law ayaa jira,

markaa waa in company lawgii loo raacaa. Markaa hadii xeer walbaa hab u sameeyo shirkado gaara ah, sabab intaaba la isugu keeno meesho kuma jirto, waayo xeerarkalaa ku shaqo leh, waxaa meesha soo gali karaa waa documentiga sharciga eehay'adiihii sharciga u lahaa siiyeen uu ogaysiin siin karo, sharciyad kale oo looga baahan yahay ma jirto, markaa qodobkaa waa inaan aad loo tiigaalin, ee waxa qudha ee loo baahanyahay waxa weeye hay'ad kastaa haday sharciyadeedii soo dhamaysato ha u gudbiyo ama ha ogaysiiyo documentigiisii si loola socdo uun, intaas uun ha laga dhigo.

**Qodobka 35^aad^** ee laalista ururada faqrada 1aad waa arrin garsoor markaa waxay u baahan tahay, in gudida awood u leedahay inay maxkamada waydiisato in la laalo go'aanka oo awooda maxkamadaa leh, waana inay ku qanacdaa dhagaysataana dhinacii kale ee la lahaa nabadgalyada buu wax yeelayaa, markaa waa inay maxkamadu go'aanka yeelataa, ee aan la odhan sida faqradan ku qoran nabadgalydu waydiisato ayay maxkamadu go'aan ka soosaaraysaa, waana in wixii cadaalad daro keenayaa meesha ka baxdaa.

**Qodobka 35^aad^ fa/4^aad^** waxaa ku qoran ku dhaqmi la'aanta labada Qodob 25 iyo 26 ee xeerkan hadii falku aanu keenayn danbi intaas ka culus waxaa lagu mutaysanayaa lacag dhan 10,000,000/s.lsh ah ama xadhig lixbilood, qodobani waa cutubkii ka horeeyay, waxaana filayaa khalad xaga madbaca weeye, markaa waxaan filayaa inuu jeedo 33 iyo 34 labadaa qodob, markaa halkaasi saxniin bay u baahan tahay

Markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerkan lala akhriyo xeerarka uu khuseeyo, wa bilaahi tawfiiq.

**5) Aadan Muxumed Hoori:-**

**Qodobka 5aad** Guddida Nabadgalyada Heer Qaran.halk wasiirka Arrimaha Gudaha hore waa loo sheegay waxaan raacsanahay in Madaxweynahah lagu badalo oo uu isagu madax ka ahaado Gudidan.

**Qodobka 14aad, f/2aad.** Halka xoog kula kaxaynta dadka banaanbaxyda samaynaya waa arrin khatara, inamo yar yar oo imtixaan ka cabanaya ayaa wada soo mari kara, markaa hadii xoog lagu kala kaxeeyo, soo inayaguna dhagaxaan tuurimaayaan oo rabshadii sii badanmayso, markaa xoog kula kaxayntan qayaxan aynu ka danyno oo taa dib aynu ugu noqono oo aynu khafiifino.
**Qodobka 20^aad^.** Wuxuu qorayaa cidii ku xadgudubta qodobadaa hore, waxaa lagu ganaaxayaa saddex bilood ilaa lix bilood oo xadhiga 3,000,000 ilaa 6,000,000, iyadoo aan la cadayn xadgubkaasi noocuu yahay, markaa inan yar oo dhagax tuuray hadii la yiraahdo wuu ku xadgudubtay, markaa anigu waxaan qabaa in loo daayo xeerka ciqaabta Guud, oo aynu nidhaahno si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud, Si ayna contradiction isugu samayn xeerarku.

**Qodobka 27^aad^ faq 1^aad^**. Xaflad iyo isu imaatinka, waxayaabahaas amar cad laga bixiyay inay tahay danbi, war 500 oo xafladood baa habeenkasta laga sameeyaa Hargiesa, markaa hadii la yiraahdo waxkasta maayarka amar ha looga sooqto ma haboona, dadbaaba inaga mashquulsan ciyaarahaa iyo xafladahaase dadka ha inagu soo jeedinina, markaa waxyaabahaas oo dhan wax laga badalo ayaan qabaa.

**Qodobka 33[aad].** Laalista ururada, ha laga dhigo urur bulsheedyada, waayo ururada Siyaasada waa loo soo qaadan karaa oo waa loo isticmaali karaa, markaa hadii kuwaasi iskaga keen khaldamaan khal khal bay keenaysaa, oo hadii la yiraahdo ururkii la furtay bilayskaa laalay, anigu intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa. Waad mahadsantihiin.

**5) Maxamed Saalax Cige:-** marka hore waxaan waxaan mahad gaara u soo jeedinayaa gudidda arrimaha gudaha iyo difaaca ee gobolka wakiilada ee soo sameysay xeerka hawsha ay soo qabteen oo ay si hufan u soo diyaariyeen mashruuc sharcigan.

Intaana xeerka u gudbin waxaa laga maarnaan ah in xeerkastaa leeyahay, mabaadiid lagama maarmaan, sidaaas darteed waa in xeerka loo eego, hadaan u soo noqdo.
Qodobka 22aad oo tilmaamaya xuquuqda asaasiga ah waa in markaas xeerka gudihiisa laga helo u jeedooyinka loo abuuray xeerka, xeerkan waxaad moodaa in xuquuqda looga baahan yahay aanu si fiican u guda galin, markaas waxaan odhan lahaa waa in si fiican loo nadaamiyaa,

Xeerka ha lagu cadeeyo dadka caafimaadka qaba iyo kuwa kale ama in la isku darin mark hadii uu yahay xeer nabadgalyo, waayo waa inuu xeerku ilaaliyaa dadka iyo nabadgalyadiisa iyo caafimaadkiisaba, xeerka gudihiisa waxaa ka muuqda nabadgalyda oo kaliya, laakiin waa in la baadhiyo inkastoo uu yahay xeer nabadgalyo, waxaan soo jeedin lahaa in xeerkan cutubkiisa labaad la akhriyo xeerka ciqaabta guud cinwaanka xeerkana waa in laga dhigaa (xeerka nabadgalyada Guud), hadaba waa in la qeexaa nabadgalyada guud ee xeerku sheegayo, taliska booliiska iyo awooda gudiddu yeelanayso.

Hadaan u soo noqdo xeerka, **Qodobka 2[aad]** u jeedada xeerka halaga dhigo **xeerka nabadgalyda Guud). Qodobka 3[aad]** waa in la dooro waxa la raacinayo sida shareecada, **Qodobka 4[aad]** waa in la balaadhiyaa xeerka laguna daraa in madaxweynuhu dhisi karo gudida, waana in bulshada wax laga soo daraa mar hadii uu yahay, Xeer nabadgalyo.

**Qodobka 8[aad] farqadiisa 2[aad]**, waa in la raacaa xeerka ciqaabta guud. **Qodobka 9[aad]** waxaan soo jeedin lahaa inuu amro madaxweynuhu. Sidoo kale **Qodobka 10[aad] farqadiisa 1[aad]** waxaan anigu odhan lahaa in faqradani mushkilad keenayso ee ciqaabta ha loo daayo Xeerka Ciqaabta Guud.

**Cutubka 3[aad] ee xeerka, qodobka 22[aad]** waan ka saari lahaa sababta oo ah, ciqaabaha ama ganaaxyada xeerku qorayo waxaan u dayn lahaa Xeerka Ciqaabta Guud.

4. **Farxaan Maxamed Cali:-** anigu waxaan ku talin lahaa in saxeexii gudida oo meesha ka maqan tahay in lagu soo qoro, xeerkan waxaan qabaa inuu yahay xeer ay ka muuqato khaladaad badan, sida gudidda u bixinay, ruqsadaha ururada, habka loola dhaqmayo banaanbaxyada, ganaaxyada oo iyana u baahnaa in xeerka ciqaabta laga soo dheegto.

Hadaan eego xeeka, **Qodobka 29[aad]** ciqaabta qodobkani sheegayo ee qasiraada lacagta waa in lala akhriyaa Xeerka Ciqaabta Guud. Qodobka 8aad, waxaa uu leeyahay(mudo go'an) markaa lama hubo in baadhistu dheeraan karto iyo in kale markaas mudo go'an ha laga daayo.

Anigu waxaan odhan lahaa, hadii mudaharaadyadayaasha iska sito baaskoolad uu sharci u haysto, waxaan qabaa inaan laga qaadin mar hadii uuna dembi ku galaynin. Waxaan kaloo odhan lahaa banaanbaxayaasha waa in aan xoog loo adeegsan, sida rasaasta lagu rido, ee ha la raaco waxa dastoorku ka ogol yahay.

5. **Dr. Cali Yuusuf: -** mudane gudoomiye, Xeerkani waa xeer aad muhiima u ah, laakiin u baahan shaqo badan, laba arrimood buuna awood saarayaa oo ah, Mudaharaadyada iyo Argagixisada ama cidii khatar ku ah Nabad, laakiin waxyaabaha khatarta ku ah dalkeena way badan yihiin sida shaqa la'aanta iyo ilaalin la'aanta dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.
Sidoo kale cadaalada darada ayaa keeni karta arrin nabadgalyo daro ah, sida jago la isku qabtay ayay wax wayn ka yimaadaan, sidaan hore u sheegay xeerkan wuxuu ka hadlayaa mudaharaadka markaa laba arrimood baa u baahan in la isku miisaamo kuwaas oo ah xoriyada qofka iyo ilaalinta nabadgalyada hadii miisaanku lumo labadaas la isku heli mayo, markaa waa in la isku balancegareeyaa.

**Qodobka 6$^{aad}$.** Xilka iyo awood gudidda nabadglayada qaranka, xubinta fulinta go'aamada wuxuu ku soo gabagabaynayaa waxaa go'aan ka gaadhaya wasiirka iyo Gudida Gobolka, markaa halkaa waxaan ku dari lahaa ***sida waafaqsan xeerarka dalka iyo dastuurka.***

**Qodobka 7$^{aad}$ faqrada 2$^{aad}$.** Anigu waxaan odhan lahaa ciidanka qaranka waxa loogu yeedhaa waa wax weyn markaa waxaan odhan lahaa ***waa inay noqotaa Ogolaanshaha Madaxweynahah*.**

**Cutubka 3aad.** Wuxuu leeyahay ciidanka qaranka marka la hawl galiyo wuxuu yeelanayaa shakhsiyada ciidanka booliiska, kolkaa qofku shakhsiyadii ma badali karee, ***Habdhaqanka ayay ku wanaagsantahay.***

Xeerkani wuxuu u baahanyahay proof reading oo kalmado khaldan baa ka buuxa, markaa Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa inaynu yeelano Qof xeerarka Proof reading ku soo samaysa, banaanbaxyada hadaan si guud uga gahdlo, xeerkani wuxuu leeyahay banaanbaxyada waa la ogolyahay, hadana meelo badan limitation buu ku samaynayaa, sida **Qodobka 10$^{aad}$ faqrada 1$^{aad}$** AMA ayaa ku jirtaa markaa inta ama laga daayo, waa in cadaato sababaha uu wasiirku u diidi karo banaanbaxa oo ayna kaliye noqon haduu doono wuu diidi karaa haduu doonona wuu ogolaanayaa.

**Qodobka12aad.** Waa halkaa ka maqan in qofka rid hubka inuu danbigiisu ka siiweynaanayo.
**Q14aad/F2aad.** Halka banaanbaxyda, waxa lagu kala kaxaynayo ha lagu kala cadeeyo xeerka.
**Qodobka18aad** meelaha lagu daadinayo suntan waa in iyana xeerka lagu cadeeyaa xeerku ma cadaynayee. **Qodobka20aad,** dabka waa in laga fogeeyaa 20km si nabadgalyada loo ilaaliyo,
**Qodobka 24aad**, waxyaabaha dhawaaqa dheer waa in lagu daraa Hoonka baabuurta iyo xadhkaha iskgaadhsiinta, **Qodobka 23aad,** anigu waxaan odhan lahaa filimada waxtarka u leh dalka waa in laga reebaa mamnuucida filmska.
**Qodobka 28aad** waxaan ku dari lahaa hadii filimka anshixiisu wanaagsanyahay ha laga reebo kuwa la mamnuucayo.

**Qodobka 33aad**, anigu waxaan odhan lahaa caruurta aan somalilanderka ahayn ha laga saaro meelaha wax lagu xanaaneeyo, kuwa somalilanderka ah ayay dawlada ilaalintood saran tahay kuwa darbi jiifka ahina ajaanib bay u badan yihiin. Waxaan ku dari lahaa Qodob 34aad oo sheegaya waxa jira caruur dhaqan celis ah oo dibada laga keeno, kuwaas waxaan odhan lahaa ha laga saaro kuwaan somalilanderka ahayn. Wa bilaahi tawf

6. **Axmed Cabdi Nuur (kijaandhe):-** waxaan u mahad celin lahaa gudidda soo sameysay xeerkan ooh awl soo qabatay, anigu waxaan qabaa in xeerkan uu baal marsanyahay distoorka iyo xeerarka kale ee wadanka, sida xeerka ciqaabta guud, sidaa darteed, waxaan si mug leh u soo jeedin lahaa in mudanayaal aynu ka fiirsano xeerkan ina horyaala, oo ah xeer nabadgalyo.

   Hadaba hadaan u soo noqdo xeerka:-
   **Qodobka 2aad** ee xeerka, ee magacaabid xeerka waxan odhan lahaa (xeerka nabadgelyada gud)
   **Qodobka 5aad** (waxaan ku soo kordhin lahaa laba xubnood:-
   Hal sharci yaqaan
   Xubin ka socota arimaha bulshada

   **Qodobka 9aad,** (awoodaha gudida) waxaa soo jeedin laha in awoodaha in laga dhigo
   **Qodobka 8aad** ee sheegaaye in qofka tuhun lagu xidhi karo, waxaan odhan lahaa waa khalad in qofka muwaadinka ah tuhun lagu xidho taasi ma fiicna waxayna keenaysaa kacdoon
   **Qodobka 10aad** (ee banana baxyada) waxaan odhan lahaa in xeerka lagu cadeeyo sida loo kalla kaxeynayo iyo waxaa loo isticmaalayo anigu ma qabo in la isticmaalo rasaas iyo xoog kaloo kaduwan.

   Marka ugu danbayn gudoomiye, xeerkani wuxuu u baahanyahay hayban badan oo contradiction badan baa ku jira, tan kale awood la odhan karo waa la taabanayaa meesha kuma jirto.

7. **Ibrahim Axmed Haybe.**

Horta xeerka nabadgelyada waxaan odhan lahaa waa in tafsiir badan la saaraa oo la fasiraa **Qodobka** 5aad halka ku qoran (Gudida Qaran) Waxaan kubedli lahaa gudida Nabadgelyada, waayo waxa iman karta gudiyo kuwan ka saraysa kuwan metella hadii wadanka ddagaal ka dhaco Gudiyadan la magacaabay waxa lagu badiyey taliyaha sirdoonka qaranka, hadaba anigu waxaan odhan lahaa sirdoonka qaranku waxa uu ka mid yahay 3da ciidan ee qaranku leeyahay sida a) ciidanka policeka b) ciidanka asluubta c) ciidanka qaranka, markaa waa in mid uun la hoos keenaa
**Qodobka 8aad F1aad**, waxaan u arkaa in farqadaasi tahay sharci daro waayo waxa ay amraysaa in qofka la iska xidho ka dib marka gudida nabadgelyadu amarto maxkamada qofka ay ka shakido (waxaan ku talin lahaa in farqadaas 1aad ee qodobka 8aad laga saaro)
**Qodobka 8aad F3aad** waxaan odhan lahaa mudada 30ka cisho ee maxkamadu xidhayso qofka ay tuhunsan tahay sodonkana la leeyahay hadii wax ku dhamaan waayaan 30kale haluugu daro waxaan u arkaa in khalad ay tahay ee halahga dhigo 48 saacadood gudahood, hadii intaas wax klu soo dhamaan waayaan hala sii daayo Qofka muwaadinka ah (waxaanan soo jeedinayaa halaga saaro **farqadaas 3aad** )
**Qodobka 9aad/F4aad:** farqadaas waxaan qabaa in ay tahay xukunkii degdega ahaa ee halaga saaro waayo waxay odhanaysaa qofka loo arko inuu nabadgelyada halis ku yahay in aanu mudo cayiman ka bixi Karin dalka magaalada uu joogo ama gurigiisa sidaasi waa Xabsi iska caadiya

markaa hal;aga saaro farqadaas, hadaba in muwaadinka la yidhaahdo wadanka kama bixi kartid caruurtaada ma kaxaysan kartid taasi waa khalad waana xukunkii degdega ahaa oo cadaalad daro ah tii aynu doonaynay in la bedelo ayuunbaynu sii dheeraynay markaa waxaan soo jeedin lahaa in farqadaas laga saaro meesha.

**Qodobka 9aad F/4aad** isla farqadaasi halagasaaro waayo waxay leedahay waxa ay leedahay maxkamadaa awood u leh markay hesho soo jeedinta xeer ilaaliyaha guud ama ciidanka booliska waxay soo saaraysaa amar sababaysan oo ay mudo cayiman kujoojinayso in uu dalka soo galo qof koox ama urur loo arko inuu nabadgelyada halis ku yahay (hadaba waxaan soo jeedinayaa mar hadii loo arkay in qof halis nabadgelyada ku yahay maxay maxkamadu go'aan u gaadhi waydayoo sharciga la mariyo, farqadaasina waa xukunkii degdega ahaa ee halaga saaro)

**Qododka 14aad/F1aad:_** kala kaxaynta banana baxyada waan taageersanahay laakiin side lookala kaxaynayaa hala cadeeyo ma hub ayaa lagu kala kaxaynayaa qodobkan halagu cadeeyo waxa lagu kala kaxaynayo sida rasaasta rabadhka ah, biyah, qiiqa dadka lagu kala eryo (markaas waxaan rabaa in farqadaas lagu cadeeyo waxa dadka lagu kala cadaynayo bilayskana waa inloo doono wixii ay kukala kaxayn lahaayeen mudaharaadada)

**Qod.37aad/F1aad :** waxa uu odhanayaa (waxa la laalay xeerkasta oo ka hor imanaya ama aan la socon Karin xeerkan) hadaba waxaan odhan lahaa xeerkan iyo xeerarkii hore ee jiray ha la isla akhriyo sidii xildhibaanadii hore sheegeen oo la keenaa xeer saxa oo aan iska hor imanayn.

8. **C/qaadir Jaamac Xaamud:**

Anigu waxaan ku bilaabayaa xeerka sida habaynta xeerka, tusmada iyo cutubyada oo xaga hore lagu muujinayo gudahana waxa kujira cutubyadii, hadaba hadaan u galo qodobada.

**Qodobka 5aad** qaabka loo dhisayo gudida nabadgelyada qodobkaas waan taageersanahay hadaba waxaan ku soo kordhin lahaa.

- Hal sharci yaqaan
- Qof ka tirsan Arimaha Bulshada

**Qod.5aad/F.c:** iyana waxaan ku soo kordhin lahaa laba xubnood oo sharciyaqaano ah 2) qof ka tirsan arimaha bulshada.

**Qod.9aad:** (awooda gudida nabadgelyada waxaan u arkaa in aanu qodobkaasi aad u cadayn waxaanu qodobku ka hadlayaa tuhun hadana waxa ku qoran 30 cisho oo xadhig ah.

**Qod.10aad F1-2-3aad** (Waxaan odhan lahaa shirarka yaryar, sida xafladaha aroosyada halaga saaro meesha iyo wixii lamid ah.

**Qod.10aad/F4aad:** (gudida nabadgelyada rusqada lawaydiisanayo waxa kaga hagaagsan wasiirka Arimaha Gudaha)

- ✓ Banaan baxyada ma jecli in xoog lagu kala kexeeyo sidii horeba u dhacday markaas waxaan soo jeedin lahaa in Qodobadaas ka hadlaya banaanbaxyada hoos loo eego.

**Qod. 23aad :_**(ee ka hadlaya bandhig masraxeed iyo daawasho filim ) waxaan anigu soo jeedin lahaa hadii aan filimku ahayn mid anshax xun oo uu yahay film diiniy, waxbarasho ah, anigu waxaan odhan lahaa hala mamnuuco filmka anshax xun uun.

Qod. 24aad/F1 Waxaan ku soo dari lahaa hal xubin oo sharciyaqaan ah wax kastana sharci iyo aqoon ayay ku socdaan, waxaan soo jeedin lahaa marka waxyaabahaas aan ka soo dooday marka lasaxo in la ansixiyo xeerka.

9. **Xil. Maxamed Nuur Caraale (Duur)** Runtii xeerkani oo xeerka nabadgelyada loogu yeedhay wixii qodobo ah ee la taa taabtay dib ugu noqon mayo. Hadaba xeerkan oo xambaarsan gudi lug

ku yeelanaysa garsoorka ganaax iyo xadhigna lagu xusay waxaa uu u baahan yahay in mabaadiida guud laba qodob ka eegno.

**Qod. 3aad /F1aad:** halka u qoran si waafaqsan shareecada islaamka (waxaan anigu odhan lahaa in xeerkani waafaqsan yahay shareecada islamka iyo Dastuurka ) waa in la hubiyaa in xeerkani shareecada iyo dastuurka waafaqsan yahay waayo cabsida nabadgelyada ka qabnaa waa inaanay ku dhicin muwaadin tuhun lagu qaaday markaa Qodobka 2aad ee xeerka ka eegayno waxa weeye is waafajinta nabadgelyada oo muhiim ah iyo xuquuqda muwaadinka.
Markaan gudo galo xeerka magaca waxaan waafaqsanahay ragii yidhi magaca xeerka haloo bixiyo xeerka nabadgelyada guud iyo anshaxa.

**Qod. 6aad/F2:** waxa lagu cadeeyey in aan gudidu lahayn awood garsoor hadana xeerku waxa uu siinayaa inay awood garsoor leedahay waayo qodobku waxa uu awooda si dadban u siinayaa in maxkamada iyo booliska u marayaan qabashada qof iyo in mudo lahayn karo, waana awoodii garsoorku lahaa in qof la xidho, lana qabto.

**Qod.8aad/F1aad:** ayaa cadaynaysa hadii qof la tuhmo hadaba maxkamadu waa tiir madax banaan ee maaha in cid kale u yeedhiso waa in xeerkan lagu cadeeyo in maxkamadu ay madax banaan tahay.

- Kelmada police ayaa loo marayaa wax weeye in qabashadu ka horayso maxkamada
- Xeerkan waxa kujira in qofka sadex cisho la haynkaro oo aan ku cadayn distoorka ee halaga saaro.

**Qod.9aad** waxaa ka muuqda in maxkamadu hoos tagto gudida nabadgelyada bal waxaad akhridaan (awoodaha kale ee gudida N/Gelyada qaranka) markaasaa la sii hoos dhigay maxkamadii.

**Qod 24aad** waxa uu dhisayaa laba gudi weli intii weli intii dooda mudanayaashu socotay maan maqal markaas xeerkani waxa uu dhigayaa gudi kale oo ka kooban (5 wasaaradood) iyo laba xubnood oo dhaqan yaqaan ah una xilsaaran bandhig masraxeedka iyo filimada iyo ciyaaraha iyo wixii goob banaan lagu soo bandhigo, runtiina laba gudi xeer ma wada dhisi karo laakiin hal gudi uun ha dhiso, hadaba waxyaalihii anshax xumaan ahaa waxaan odhan lahaa yaana gudi kale laga sugin ee gudiyadana mid qudha ha laga dhigo gudidaas labaad xeerka halaga saaro gudidana aan u bixino (Gudida nabadgelyada guud iyo Anshaxa) Xeerkan waxaa kale oo ku cad kaantaroolo la saarayo ganacsiga ama qof meherad furanaya markaas taas waxaan leeyahay ha la dabciyo.
Waxaanan soo jeedinayaa sidan:

- In xeerkan dib loogu noqdo iyadoo la waafajinayo shareecada islaamka iyo dastuurka
- Inaan la abuurin gole leh hawshii garsoorka ama dusha ka amraysa haayadii garsoorka
- In lakala saaro nabadgelyada iyo xaqa muwaadinka
- Waxaan golaha u soo jeedin lahaa in la keeno qof la taliye shareecada islaamka ah goluhuna maleh waayo shuruucdan aan samaynaynaa waa in shareecada la waafajiyodad muslimiin ah waan nahay islaamkuna waxa uu ina amrayaa inaynaan dejin xeer shareecada islaamka ka hor imanaya

- Waa in la is waafajiyaa sharciga ciqaabta guud xeerka nabadgelyada iyadoo xeerkani uu ku dhamaanayo Ciqaab.

10. **Xill : Saleban Cawad Cali:-** Anigu meelihii aan ka soo akhriyay xeerkan hadaan toos u guda galo waxan soo qadan lahaa: **Qodobka 5aad** . Gudida waxan u soo dari lahaa qof yaqana diinta mar hadii ay tahay anshax. **Qodobka 8**[aad] waa in la cadeeyaa tuhunka waxa iman karta wanjalaad.

    Halka u qoran mudo go'an waxan rabaa in la cadeeyo, anigu waxa aan odhan lahaa 14 maalmood ama todoba maalmood ha laga dhigo.

    **Qodobka 9**[aad] anigu waxa aan qabaa in meesha laga saaro farqada ku qoran awoodaha gudida.
    **Qodobka10**[aad] (waxan odhan lahaa fagaare banaan) halka la yidhi ha laga dhigo fagaare dadka ka dhexeeya ama fagaare furan.

    **Qodobka 10**[aad] **F/1**[aad] ( halkan u qoran sadex cisho gudohood waa in laga diida ama laga ogolaadaaa) kalmadasi waa kalmad xun aniga wan ka saari lahaa markaas waxa aan odhan lahaa 24 sacadood gudohood ha ku soo ogaysiyaan

    **Qodobka 12**[aad:] dhamantiis qodobkaa wan ka saari lahaa
    **Qodobka 14**[aad:] qodobkaas hablka loo joojinayo banaanbaxyaasha ma cada iyo sida looga hortagaayo hadaba waa in qodobka lagu cadeeya nooca hubka lagaga hor fagaayo banaanbaxyaasha, hana noqoto mid sharciga waafaqsan,

    **Q14**[aad]**.** Waxaan ku dari lahaa faraqada sadexadaad oo ah ( waxa reeban in qofka waxa naftiisa waxyeelaya loo isticmaalo, sida rasaasta nool oo kale)

    **Q 22-**[aad]. Waa in xeerka ciqaabta guud lala xidhiidhiyo qanaaxaas la qaadayo, wanan in loo daayo maxakamada awooda u leh.

    **Q45**[aad] meesha la saaro waayo qodobkan xeer Nidaamiyaal meesha loogama baahna.

11. **Xill: Ibrahim Jamac Ali :-** Anigu waxa aan qabaa in marka hore aynu nabadgalyada aynu saarno tafsiir, Xeerkan aniga waxa uu illa eg yahay xeerkii la laalay ee xukunka degdega ahaaa waxaanad moodaa in xeerkani wado cidla ah iska jibaaxayo sidaa darted waa in xeerka la laalaaa Waxanad moodaa ama u badan yahay in xeerkani distoorka iyo xeerarkii kale ee wadanka uu baal marayo

    Takale gudiga nabad distoorka kumaba jirto waxaanad xeerkani ka dhigayaa gudi cabudhin,
    Waxa kalood arkaysaa marka mudaaharaad la qabanayo w/daakhiligu lagama tashan karo ee sababtu waxa weeye in la ogaysiiyo in hadii rabshado yimaadan uu ogaado ama dhici karaan
    Hadaba waxaan soo jeedin lahaa xeerkan ha laga noqdo halana tashada w/hawlha guud caafimadka, police

    Halka u qoran sida (tuhunka) oo aynu u turjuman karo danbi ayuu gali karaa, maaha qofka la tuhmo inuu xeerka yidhaahdo waa la xidhi karaa. Xeerkan waxa ka maqan wixii xakamayn lahaa police, meletiriga, hubka xadhiga iwm Waxa aan soo jeedin lahaa in xeerkan la celiyo waayo

waxad moodaa inuu dastuurka baal marayo.Mana haboona in wasiirka daakhilig ruqsad looga qaato aroos.

**15. Xill: C/Karin Aw Cali Shabeel**

Waxaan aad u soo dhowaynayaa xildhibaanada iga horeeyay sida xildhibaan Rayte oo sheegay in xeerkani baal marsan yahay Distuurka wadanka xeerkani waxad moodaa in uu yahay xeerka xukunka degdega ah ama kii dawladii hore.

Xeerkan waxa aad moodaa in uu yahay fikrad gabowday, Xeerkan nabad galayada waaa in lala akhriyaa Xeerka Ciqaabta Guud. Hadaba waxa aan soo jeedin lahaa

- In xeerkan dib loo celiyo
- Xeerkani waxa uu u muuqdaa in uu curiyaaminayo nabadgalyada qaran
- Xeerkan waa in Gudi loo saara

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**-----------------------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
**-----------------------------------------------**